

**Su'aalaha inta badan la isweydiyo ee ku saabsan siideynta Minute-ka ee baaxadda baaritaanka**

<b>Su'aal</b>	<b>Jawaab</b>
Waa maxay baaritaanku?	Dhimasho-baadhaha ayaa qabta su'aal weydiin si uu wax badan uga ogaado meesha, goorta iyo sida uu qofku u dhintay. Su'aal weydiinta ayaa sidoo kale ka caawisa dhimasho-baadhaha inuu soo jeediyo talooyin ama faallooyin laga yaabo inay ka hortagto geeri la mid ah inay mustaqbalka dhacdo.
Waa maxay 'Minute'?	Waa bayaan rasmi ah oo ka soo baxo garsoore ama dhimasho-baadhe. Waxay noqon kartaa amar ah in wax la sameeyo, soo koobid wax ka dhacay maxkamadda, ama go'aan la gaaray.
Waa maxay denbi baadhitaanka?	Inta lagu guda jiro baaritaanka dhimashaha, haddii dhimasho-baadhu uu u baahan yahay inuu ka maqlo markhaatiyaasha shaqsi ahaan, waxay qaban doonaan dhageysi maxkamad, kaas oo loo yaqaan denbi baadhitaan. Qoysaska qofka dhintay, dadka xiisaynaya, iyo mararka qaarkood xubnaha dadweynaha, waxa laga yaabaa inay ka qaybgalaan denbi baadhitaanka.
Waa maxay dhegaysi?	Waa dacwad sharci ah oo arrin sharci ama xaqiiqo ah laga doodayo oo dhinacyadu u soo bandhigaan caddaymo iyo u soo gudbin maxkamadda.
Waa maxay macnaha 'baaxadda baaritaanka'?	Kuwani waa arrimaha uu baadhi doono dhimasho baadhaha gudaha baaritaanka.

Su'aal	Jawaab
<p>Minute-ku wuxuu xusayaa in dhageysiga maxkamada uu dhici doono Diisembar 2021. Kani ma baaritaan denbi baa?</p>	<p>Maya</p> <p>Kani waa dhageysi maxkamadeed ee horudhaca ah oo la qabanayo si loo dhageysto fikradaha qoysaska iyo kuwa daneynaya ee ku saabsan baaxadda la soo jeediyay ee baaritaanka.</p>
<p>Sideen ku heli karaa caawimo fahamka Minute-ka iyo waxa ay ka dhigan tahay?</p>	<p>Fadlan la hadal qareenka aad maalgeliso haddii aad mid leedahay. Waxay awoodi doonaan inay ku caawiyaan oo ay kuu sharxaan waxa uu minute-ku adiga kuu yahay.</p> <p>Haddii aad tahay xubin reerka qofka Shahiidka ah, ama dhibbane dhaawac kasoo gaaray rasaas, oo aadna weli qareen u qaban, waxaad weli caawimaad ka heli kartaa qareennada la maalgeliyay. Macluumaadka ku saabsan sida caawimaad looga helo qareen la maalgeliyo ayaa laga heli karaa <a href="https://coronialservices.justice.govt.nz/masjid-attacks-coronial-process/legal-support/">https://coronialservices.justice.govt.nz/masjid-attacks-coronial-process/legal-support/</a></p> <p>Beddelkeeda, waxaad kala xiriiri kartaa Xafiiska Dhimasho-baadhaha <a href="mailto:coronial.response@justice.govt.nz">coronial.response@justice.govt.nz</a> ama wac <b>0800 88 88 20</b>. Shaqaalaha xafiiska dhimasho-baadhaha ayaa ku caawin kara. Waxaan haynaa caawiyaha turjumitaanka oo diyaar ah haddii aad rabto.</p>
<p>Waa maxay 'soo gudbintu'?</p>	<p>Waa dood la horgeeyay maxkamadda. Waxa uu noqon karaa mid qoraal ah ama odhaah ah (lagu hadlay).</p>

Su'aal	Jawaab
<p>Sideen u sameeyaa soo-gudbin waqtiga dhagesiga?</p>	<p>Haddii aad magacawday qareen, waxay sameen karaan soo-gudbin ayagoo adiga kumatalaaya. Haddii aadan aa lahayn qareen, adiguba waa sameyn kartaa soo-gudbin . Waxaad ku sameyn kartaa soo-gudbitaanada hab qoraal ah, ama shakhsi ahaan xiliga dacwad dhegeysiga.</p> <p>Haddii aad rabto macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan sida loo sameeyo soo-gudbinta, waxaad la xiriiri kartaa Xafiiska Danbi-baadhaha <a href="mailto:coronial.response@justice.govt.nz">coronial.response@justice.govt.nz</a> ama wac <b>0800 88 88 20</b>.</p> <p>Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan sameynta soo-gudbinta ayaa la heli doonaa dhawaan.</p>
<p>Ma awoodi karaa inaan ka soo qayb galo dhageysiga dacwada Diisambar?</p>	<p>Waxaan hadda qorsheyneynaa faahfaahinta saadka ee dhageysiga dacwada. Waan ku ogeysiin doonaa isla marka kuwan la go'aamiyo.</p>
<p>Maxaa dhacaya haddii aanan awoodin inaan ka qayb galo dhageysiga dacwada? Weli ma sameyn karaa soo-gudbin?</p>	<p>Haa. Adiga ama qareenkaaga ayaa sameyn karo soo-gudbinta hab qoraal ah ka hor dhageysiga dacwada.</p>